

# NIDAAMKA DIIWAANGELINTA DARYEEL BIXIYAHA EE

Barnaamijka Xashiishada Caafimaadka ee Minnesota

## TALLAABADA KOOWAAD



1

### Bukaanku wuxuu akoonkiisa ku daraayaa macluumaadka daryeel bixiyaha.

Tani waxay dhalinaysaa email in loo diro daryeel bixiyaha oo ay ku jirto tilmaamaha isdiwaangelintu.

*XASUUSIN: Waalidka bukaanka, mas'uulka sharciga ah ama xaasku waxay isdiwaangelinayaan isla wakhtiga uu bukaanku isdiwaangaliyo (si kala gooni ah isuma diwaangeliyaan daryeela ahaan).*

## TALLAABADA LABAAD



2

### Daryeel bixiyaha ayaa wuxuu ku dhammaystiraan diiwaangelintiisa khadka internetka.

Waa inay haystaan sawirka aqoonsi sawir leh oo ay dawladu bixisay, shatiga darawalnimada ama baasaboora diyaar u ah in la soo geliyo kombiyuurka.

## TALLAABADA SADDEXAAD



3

### Daryeel bixiyaha ayaa daabacanaya oo soo buuxiya foomka hubinta raad-raaca oo soo celinaya.

Daryeel bixiyaha ayaa soo daabaca oo buuxinaya foomka hubinta raad-raaca ah oo u soo dira MN Bureau of Criminal Apprehension, oo ay la socoto jeeg/money order \$15 ah iyo baqshad stamp lagu sii dhejiyey oo ku socota Xafiiska Xashiishada Caafimaadka.

## TALLAABADA AFARAAD



4

### Ka firi emailka in aad heshay xaqiijinta.

Marka baaritaanka raad-raaca ah la ogolaado, bukaanka iyo daryeel bixiyaha labaduba waxay helayaan email soo ogeysiinaya in daryeeluhu uu qaadan karo xashiishada caafimaadka ee bukaanka.

*FIIRO GAAR AH: Baaritaanka raad-raaca ah wuxuu qaadan karaa ilaa 30 maalmood.*